



# PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

## Dhismaha Dugsiga Harrison Park

Waxaan halkan idiinku soo gudbineynaa wararkii ugu dambeeyey ee ay inoo soo gudbiyeen kooxdeena Dhismayaashaa Dugsiyada shaqada ay qabteen taasi oo ah inay qorsheeyeen in Dugsiga Dhexe ee Harrison Park noqdo Dugsi Dhexe. Waxaan fileynaa inay muhiim tahay inaan qirano in aan mashruucan caqabado gaar ah aan waajahayno. Lama bilaabo karo shaqada dhismaha inteeda badan ilaa caruurta iyo shaqaalaha dugsiga laga saaro. Sababtanu waxay tahay, waxaa jira dhib lagala kulmayo qaar ka mid ah qalabkii dhismuhu u baahnaa oo ayna hore inoo marin, waa inay si taxadir leh u dooranaa doorashada saxda ah xadigga hawsha ee aan dhammeystiri karino inta lagu jiro waqtigani dhismuhu yar yahay ilaa laga gaarayo xilliga xaggaaga. Waxaa suurtagal ah in qeyb shaqada ka mid ah ee hoos lagu sharxay wax ka bedel ku yimaado inta lagu gudo jiro nashqadeynta.

Waxaa jira isbedelo gaar ah oo lagu sameynayo manhajka Dugsiga Dhexe iyo ardayda, sida in lagu kordhiyo fasalo saynis( Wajiga 1 #5),istuudiyo qoob-ka-ciyaarka ah(Wajiga 1\$6) , iyo la-taliyaal dheeraad ah iyo goobo STEAM9 Wajiga 2 #1 iyo 2).

### Wajiga 1aad – Wuxuu dhammaanayaa Dayrta 2022

1. In kor loo qaado aagga fadhiga ee xagga hore iyada oo dib cusbooneysiina lagu sameynao iyo waliba dhinaca nalalkana dib loo qurxinayo.
2. In kor loo qaado jid yar ee laga soo galo irida hore iyo in wax ka bedel lagu sameeyo qaabka u yaalo qurxinta ee suurtagal ah.
3. In kor loo qaado musqulaha oo ay ka mid yihiin in dib loo cusbooneysiyo iyada loo hoggaansamayo sharciga taageera dadka naafada ah (ADA), la bedelo qalabka, la dhammeystiro, iyo in musqulaha qaarkood loo bedelo inay noqdaan mid ay isticmaalaan jinsiyada oo dhammi .
4. In fasal loo bedelo inuu noqdo qol maamul ahaan loo isticmaalo.
5. In dhowr fasal loo bedelo inay noqdaan fasalo ay isticmaalaan hadda Waxbarashada Gaarka ah ee Guud inay noqdan Fasalo Cilmiga Sayniska lagu barto.
6. Qol ka mid ah dugsiga in loo bedelo inuu noqdo qol istuudiyo lagu barto qoob-ka-ciyaarka Kaasi sagxada qolka laga dhigayo loox, laguna rakibayo qalab ka ilaaliya inuu dhawaaqo bannaanka u baxo, waxaa kale oo loo sameyn muraayado, iyo qalabkii darbiya kala qeybinayo ee ku meel gaarka ahaa laga dhigo mid rasmi ah.
7. In lagu kordhiyo xafiis ay fadhiistaan la-taliyaasha Waxbarashada Gaark ah (SPED).
8. In kor loo qaado qalabka amniga oo ay ka mid yihiin ugu yaraan toban(1-) kamaro oo lagu rakibayo jidadka dugsiga ee la maro iyo goobo gaar ah oo la doorto inay ku haboon yihiin in lagu rakibo. (Ogow- goobtani sidoo kale waxay heshay qalabka aminga lagu maamulo ee dadku iska soo gali karin dugsiga ilaa shaqaalaha dugsiga ay ka furaan irida taasi oo qeyb ka ahayd mashruucii dhaqaale ee la ansixiyey sanadkii 2019-2020).
9. In kor loo qaado nidaamka Farsamada oo ay ka mid yihiin in lagu bedelo qalab cusub



## PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

qalabka heerkulbeegyada lagu cabiro, tuubooyinka hawada la bedelo goobo badan, dib loo cusbooneysiyo qalabka wax lagu kontoroolo, la nadiifiyo taangiyada, walxo fara badan oo kale.

10. In lagu kordhiyo goobtii la dhigan lahaa baaskiilka iyo in la daboolo goobta qashinka la dhigo.

### Wajiga 2 & 3 – Dhammeystirka TBD

1. Goobo u gaar ah La-taliyaasha iyo Waxbarashada Gaarka ah (SPED)
2. In la abuuro goobo u gaar ah STEAM oo ay ka mid tahay shaybaar cusub
3. In la ballaariyo Goobaha Barashada Gaarka ah iyada oo lagu talagalay goobo u gaar looga dhigay in la geeyo ardayda sidii loo daji lahaa marka ay rabshada sameeyaan
4. In dhammaan dhismaha Qufulo Cusub lagu xiro.
5. In lagu kordhiyo qeybta ciyaaraha in korka laga daboolo.
6. In horre loo mariyo Ciyaaraha oo ay ka mid yihiin in la cusbooneysiyo Goobaha Ciyaaraha iyo Wixii la hal maala, Qufulada Qoalka, iyo in la cusbooneysiyo Fadhiga Ciyaaraha.